

Waaxda Caafimaadka Minnesota



Cidda aan nahay

MDH waxay ka shaqaysaa sidii ay Minnesota uga dhigi lahayd goob wanaagsan oo qofka kasta ku noolaan karo, ka shaqaysan karo, kuna damaashaadi karo. Waaxda Caafimaadka Minnesota waxay masuul ka tahay ilaalinta, dhawrista, iyo hagaajinta dhammaan caafimadka dadka reer Minnesota.

MDH waxay leedahay shaqaale kor u dhaafaya 2,000. Waaxdu waxay soo jiidtaa oo ku nagaada shaqaale kala duwan, leh xirfado, hab-dhaqan iyo dareen caawimaya dadka reer Minnesota. Nimaadka caafimaadka dadwaynaha Minnesota waa kan ugu wanaagsan dalka. Wuxuu ku dhisanyahay iskaashi xooggan oo ka dhaxeeya MDH, caafimaadka dadwayanaha ee maxaliga ah, wakaaladaha, Dawladaha qabiilka, iyo hay'ado kale.

Hawsha aan qabano

Waaxda Caafimaadka Minnesota waxay qabataa hawlo waxtar u leh caafimaad qabka dadka.

Kuwaan waa tusaalooyin:

- La socodka cudurada faafa iyo ka jawaabista degdeggaa ah ee cudurada dillaaca.
- Xaqijintaa badqabka biyaha tuubada ee gobolka oo dhan si ay u noqdaan kuwa la cabbi karo, cuntaduna u ahaato mid la cuni karo.
- Taageerida barnaamijyada cuntada ee gobolka oo dhan kuwas oo la siiyo haweka, dhallaanka, iyo carruurta.
- Bixinta shahaadooyinka dhalashada iyo dhimashada.
- Horumarinta siyaasadaha iyo barnaamijyada looga hortagayo cudurada daba-dheeraada iyo hagaajinta caafimaadka dhimirka.
- Kormeerka guryaha dadka lagu xanaaneeyo, isbitaalada, iyo tashiiaadka kale si loo hubiyo daryeel tayo leh.
- Ururinta iyo falanqaynta xogta nidaamka daryeelka caafimaadka Minnesota si loo taageero dib u habayıtiisa.
- La talinta ku saabsan sida loo yareeyo khatarta deegaanka iyo wasakhowga caafimaadka.
- Ka baadhista dhallaanka cusub xanuunada dhifka ah iyo maqal la'aanta si looga hortago dhibaatooyinka caafimaad ee muddada dheer.
- Yaraynta saamaynta caafimaad ee ay keento isbeddelka cimilada iyo cimilada aadka u daran.
- Siinta deeqo iyo qandaraasyo kooxaha bulshada si ay u taageeraan dadaallada asaasiga ah ee lagu horumarinayo caafimaadka.

Minnesota Department of Health
625 Robert Street North, PO Box 64975, St. Paul, MN 55164
651-201-5000 | health.mn.gov

Contact health.communications@state.mn.us to request an alternate format.



Caafimaadka Dadweynaha si wadajir ah ayaan u xaqijin karnaa si bulshada u noqoto mid caafimaad qabta.

— Machadka Caafimaadka



Horumarinta caafimaadka qof walba

Shaqada Waaxda Caafimaadka MDH waxaa asal u ah in ay barnaamijyadeeda ay ku dhisnaadaan cadaalad caafimaad. Horumarinta dhammaan caafimaadka bulshooyinka waa wax ka go'an qof kasta oo waaxda ka mid ah. Sinnaan la'aanta caafimaadka waxay timaadaa kolka dadka qaarkood ay ka caafimaad wanaagsan dadkii kale. Daraasad ayaa muujinaysa shuruudaha caafimaad qabka in ay yihiin nabadda, hoyga, waxbarashada, cuntada, dhaqaalaha, iyo cadaaladda bulshada. Caafimaadka kaliya kuma koobna ka hortagga cudurada iyo dhaawacyada. MDH waxay ku dadaalaysaa qof kasta in uu caafimaad qabo iyada oo la kaashanaysa bulshooyinka iyo bahwadaagta caafimaadka, sidoo kale MDH waxay eegtaa arrimaha ka qeyb qaata caafimaad qabka.

Macluumaadka iyo xogta dhammaan dadka reer Minnesota

Dhammaan dadka reer Minnesota si ay wax u fahmaan una qaataan go'aano ku subaasan caafimaadkooda, MDH waxay ka shaqaysaa ururinta iyo baahinta xogaha. Tani waxay ka dhigan tahay ururinta xogta matalaysa dhammaan bulshooyinka, sida bulshooyinka midabka leh iyo bulshooyinka asaliga ah, dadka naafada ah, LGBTQIA+ bulshooyinka, magaaloooyinka iyo bulshooyinka miyiga, iyo in kale oo badan. Haysashada xogta dhammaan bulshooyinkan waxay naga caawin kartaa inaan si fiican u fahanno baahiyaha caafimaadka oo aan siino macluumaadka iyo agabka ugu wanaagsan ee dadku ku heli karaan caafimaad qab.

Xalalka bulshada ee saamaynta gobolka oo dhan

Bixinta deeqaha iyo qandaraasyada lagu maalgeliyo barnaamijyada maxalliga ah ee gobolka oo dhan, MDH waxay taageertaa xalalka ay bulshadu wado si wax looga qabto sababaha asaasiga ah ee keena kala duwanaanshaha caafimaadka iyo horumarinta caafimaadka dhammaan dadka. Xalka ugu wanaagsan ee lagu hagaajinayo caafimaadka dadweynaha waxay si toos ah uga yimaadaan bulshooyinka. MDH waxay si dhow ula shaqeysaa dadka ay u adeegto si ay wax uga qabato arrimaha muhiimka u ah iyaga, la kulanka meelaha ay joogaan, iyo ka wada shaqeysinta xiriir waxtar leh.